

### Caddeyn Musharraxnimo

#### Waxaan si daacadnimo iyo shaqsiyad leh halkaan uga caddeynayaa:

1. In aan ahay Musharrax Xildhibaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
2. In aan buuxin karo shuruudaha Dastuurka dalka, habraacyada iyo xeerarka doorashooyinka ee 2020/21, si la ii doorto in aan ka mid noqdo xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
3. Waxaan mar kale si daacadnimo ku dheehan u caddeynayaa;
  - a) In ahay muwaadin ka tirsan Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed
  - b) In uu dhimirkeygu dhan yahay
  - c) In da'deydu ka yarayn 25 sano
  - d) In ay xuquuqdeydi muwaadinimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shanti (5) sano ee ugu danbeysay.
  - e) In aan leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.
  - f) In aanan ka tirsanayn ama wax xiiriir ah la lahayn kooxaha argagixisada ah.
  - g) In aan haysto warqadda danbi la'aanta ee hay'adda danbi baarista (CID) ee dalka.
  - h) In aan bixiyey lacagta diiwan-galinta u tartamidda xildhibaanimo, kuna shubey xisaabta bankiga ee Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federaalka .
4. Sidaas oo kale in aan xubin ka ahayn;
  - a) Guddiyada Doorashooyinka
  - b) Guddiga Xallinta Khilaafaadka
  - c) Ergada doorashada
  - d) Odey-dhaqameed
  - e) Nabadoonada soo xulayo ergada doorashada
  - f) Xubnaha bulshada rayidka ee soo xulayo ergada doorashada
5. Waxaan dhowraya Xeerka Anshaxa Musharraxiinta ee ay ansixiyeen Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka 2020/21 ee Heer Federal
6. Waxaan soo gudbiyey waraaqaha hoos ku xusan

1	Aqoonsi	Nuqul Aqoonsi Qaran	
		Nuqulka Baasabo	
		Nuqulka Shahaadada Dhalashada	
2	Waxbarasho	Nuqul Shahaado Dugsi Share	
		Nuqul Shahaado Heerka 1 <sup>aad</sup> ee Jaamacadda	
		Nuqul Shahaado Heerka 2 <sup>aad</sup> ee Jaamacadda	
		Nuqul Shahaado Heerka 3 <sup>aad</sup> ee Jaamacadda	
		Caddeyn rasmi ah ee khibrad u dhiganta Dugsi Sare	
3	Caddeynta Bixinta Lacagta	Warqadda lacag bixinta musharraxnimo	
4	Waraaqda danbi la'aanta	Waraaqda danbi la'aanta ee hay'adda danbi baarista (CID) ee dalka	

Magaca

Musharraxa: \_\_\_\_\_

Saxiix

Musharraxa: \_\_\_\_\_

Taariikhda: \_\_\_\_\_/\_\_\_\_\_/\_\_\_\_\_

Maalinta Bisha Sanad